

# KUB - qiimaynta halista isbedelka hidde-sideyaasha

KUB waa erey la soo gaabiyey oo u taagan is raacinta qalabka Ultraljud-ka iyo baaritaan baayo-kiimiko ah oo lagu sameeyo biyaha dhiigga. KUB macnihiisu waxa weeye qiimaynta halista isbedellada hidde-sideyaasha oo jirrooyinka ka dhasha uu ugu caansanyahay iinta Down's syndrom. Qiimaynta halista iyo baaritaannada kale ee uurjiiftu waa ikhtiyaari, waxaana la soo bandhigaa marka la samaynayo ultraljud ah wakhti hore.

## Asalkii hore

Iswiidhan waxa lagu dhalaa iinta Down's syndrom 800 ee qofba qiyaastii 1 qof, taasi waxay u dhigantaa 0,12% wadarta carruurta dhalata. Halista iinta Down's syndrom waxay ku kordhaysaa uurjiifta marka ay da'da hooyadu korodho, taas oo sidoo kalena qusaysa noocyada naadirka ah ee aadka u khatarta badan ee loo yaqaan trismoys 13 iyo 18. Maadaama halista isbedellada hidde-sideyaashu ay la kordhayso da'da dumarka, waxa aanu hore ugu casuumi jirnay dumarka ka weyn 35 sano shaybaaridda biyaha xabka ah ee uurjiifta. Laakiin in dhinaca da'da oo keli ah laga fiiriyo shaybaarka biyaha xabka ah ee uurjiifta, waxa lagu ogaan karaa uun 30% ka mid ah dhammaan uurjiifta qaba iinta Down's syndrom. Wuxuse keenaa shaybaaridda biyaha uurjiiftu halis ilmo soo dhicidedd oo ah 0,5-1%. KUB wuxu macnihiisu yahay in aynu yarayn karno tirada shaybaarada xabka uurjiifta iyadoo isla markaana ay yaraanayaan ilmo soo dhicidda uu keeno shaybaarku. KUB waxay kordhinaysaa fursadda lagu ogaan karo uurjiifta qabta iinta Down's syndrom ilaa 90%.

## Goorma iyo sidee loo sameeyaa tijaabooyinka?

shaybaaridda dhiigga waxa laga qaadayaa DUMARKA uurka leh qiyaastii wiigga 10-naad ee uurka, ayadoo la baarayo laba hoormoon oo kala ah; PAPP-A iyo  $\beta$ -hCG oo madaxbannaan. Ugu yaraan hal wiig ka bacdi waxa la sameynayaa baaritaanka ultraljud-ka, ayadoo la cabbirayo dheecaanka ku jira qoorta uurjiifka, waa baaritaanka lagu magacaabo koritaanka surka oo loo soo gaabiyey NUPP. Baaritaanka ultraljud-ka waxa la sameeyaa marka uurku marayo wiigga 11-13+6.

## Xisaabinta halista

Halista isbedelka hidde-sideyaasha waxa lagu xisaabiyaa barnaamij kombiyuutar, kaas oo koritaanka surka, jawaabta shaybaarka dhiigga, iyo weliba da'da iyo MISSANKA hooyada la isku miisaamo. Baaritaanka ka bacdi waxa aad helayso jawaab ku saabsan in ilmaha dhalan doonaa uu qabo halis yar ama mid badan oo ah dhinaca iinta Down's syndrom (trisomi 21). Haddii halistu yartahay laguguma casuumayo shaybaarid dhinaca biyaha xabka uurjiifka ah, da'da aad doonto ahow eh. Haddii suurtagalnimada iinta Down's syndrom ay badantahay, waxa lagu casuumayaa shaybaaridda biyaha xabka uurjiifka.

## Maxaa dhacaya haddii koritaanka surku yahay mid weynaaday laakiin hidde-sideyaashu caadi yihiin?

Marka uu koritaanka surku xadkiisa kor u dhaaf, waxa jira oo kale khatar kordhaysa oo ilmaha kaga timaadda isbedello kale (naafow jir dhismeed), markaas qofka dumarka ah waxa lagu casumaayaa baaritaanno dheeri ah oo la samaynayo wixii ka dambeeya wiigga 18-naad.

## Waxa kale oo aad kasii akhrin kartaa wax ku saabsan KUP meelahan:

[www.fetalmedicine.com](http://www.fetalmedicine.com)

(Waa bog ku yaal internet kale, daaqad kale ayaa kuu furmaysa)

[www.gensvar.se](http://www.gensvar.se)

(Waa bog ku yaal internet kale, daaqad kale ayaa kuu furmaysa)

[www.svenskadowndforeningen.se](http://www.svenskadowndforeningen.se)

(Waa bog ku yaal internet kale, daaqad kale ayaa kuu furmaysa)

[www.vardalinstitutet.net](http://www.vardalinstitutet.net)

(Waa bog ku yaal internet kale, daaqad kale ayaa kuu furmaysa)

[www.sbu.se](http://www.sbu.se)

(Waa bog ku yaal internet kale, daaqad kale ayaa kuu furmaysa)

